


# CUDURRADA FAAFA



WASAARADDA WAXBARASHADA

XARUNTA WAXBARASHADA

DADKA WAAWEYN

# **CUDURRADA FAAFA**

**WASAARADDA WAXBARASHADA  
XARUNTA WAXBARASHADA  
DADKA WAAWEYN**

## H O R D H A C

Buuggani wuxuu ka hadlayaa cudurrada faafa ama la isqaadsiyo ee ku badan waddankeenna Soomaaliya. Wawa loogu talagalay ka-qaybgalayaasha tababarrada lagu qabto Xarumaha Waxbarashada Reerguuraaga. Haseyeeshee waa buug la filayo inuu ku habboon yahay akhristayaasha ah dad waaweyn siiba kuwa ka soo gudbay heerka farbarashada.

Ujeeddooyinka guud ee buugga laga leeyahay waxaa ka mid ah:

- *In akhristaha lagu baaarujiyo sida cudurrada faafaa degaankiisa uga dhashaan una fidaan.*
- *In akhristaha la tusaaleeyo tabo dhaqangal ah ee looga hortagi karo cudurrada faafa.*
- *In akhristaha la tusaaleeyo astaamaha guud ee lagu aqoonsan karo cudurrada faafa kuwooda halista ah.*
- *In akhristuhu yeesho anshi ah in uu si cilmi ah ula tacaalo wixii cudur ah ee ku yimaada, waayo dad badan baa cudurka isku dhiiba ama siyaabo aan habboonayn ula tacaala.*

Waxa maamulka "XARUNTA WAXBARASHADA DADKA WAWEYN" (X.W.D.W.) u mahadnaqayaa muwadifiinta iyo xeeldheerayaasha kale ee ku hawhooday qorista iyo soo saarka buuggan markii kowaad oo la soo saaray 1980 iyo hadda oo dib loo qoray. Waxa xusid gaar ah mudan qorayaasha iyo soo saarayaasha kala ah:

1. *Jaamac Cawad Aadan oo buugga intiisa badan qoray.*
2. *Maxamed Cabdulle Bariir oo dhawr cutub qoray iyo*
3. *Manfred Wehrmann, wakiilka DVV, oo qoraalka ka qayb qaataay, qaraacay, sawirradana u sameeyay buugga.*

Iyadoo loo mahadnaqayo dadkii hore talo uga geystay buugga, waxan si xushmad leh u soo dhaweynaynaa cid kasta oo inoo soo qudbisa taloooyin ku saabsan nuxurka iyo wajiyada kale ee buugga.

Muqdisho, Agoos oo 1982  
S.B. 1032 Tel. 21072

Madaxa X.W.D.W.  
(Maxamed Cabdulle Bariir)

## T U S M O

Bogga

1.	Siyaabaha Cudurradu Jirk u galaan .....	2
2.	Jirku sida uu Jirrooyinka isaga Daafaco .....	6
3.	Meelaha Cudurradu sida sahlan uga Faafaan .....	7
4.	T a l l a a l .....	12
5.	A m e e b e .....	16
6.	Shuban iyo Xundhur .....	24
7.	D a a c u u n .....	30
8.	Gooryaanno -.....	33
9.	D u u m o .....	41
10.	Q a a x o .....	45
11.	Xiiq-dheer ama Kix .....	47
12.	Jadeeco .....	48
13.	T e e t a n o .....	50
14.	Dabayl ama Qallal .....	52
15.	Raybis .....	54
16.	Kaadidhii <small>g</small> .....	56
17.	Ka hortagga Cudurrada la is qaadsiiyo.....-	60
18.	Cudurrada ku dhaca Habdhiska Taranka -.....	63

A R A R

Buggani wuxuu ku saabsan yahay cudurrada faafa ee dadku isqaadsiyo. Cudurradaas faafiddoda waxaa kaalin weyn ka qaata dadka. Caadadooda iyo sida ay u wada dhæqmaan aaya fududeeyya faafidda cudurrada.

Caadooyinka Soomaalida waxaa ka mid ah inay weel wax ku wada cunnaan, cabbaan iyo waliba in cuntada la hambeeyo.

Caadooyinkaas bulsheed aad bay u fiicnaan lahaayeen haddii aanay jiri lahayn cudurrada ka faafa.

Xaaladdaas caafimaad darteed kahortagidda cudurradu waxay ku jirtaa kahortagidda caadooyinka dadka qaarkood si loo dhaqangeliyo kala dhawrsanaanta dadka cudurro faafa qaba iyo kuwa fayaw.

Mabaadi'da fayadhawrku waxay kala dhawrsanaantaas u aragtaa arrin lagama maarmaan ah isla markaas waxa iyana muhiim ah in dadka kala dhawrsamayaa ay si kalsooni ku jirto xaqiqada isula gartaan una dhaqangeliyan. Waa muhiim in qofka jirran la xannaaneeyo si habboonna loola tacallo. Qofka cudurka faafa qabana waxaa ku waajib ah in uu iska dhawro dadka uu la noolyahay, ha ahaadeen goyskiisa, kuwa uu la shaqeeyo, wax la barto, wax la cuno amäba ay isku beel yihiin. Waxaa kaloo ku waajib ah inuu is daweeyo.

Hubaalaha sare ee xasäasiga ah ee buugga si qaawan loogu faahfaahiyey ka sakow waxa buugga lagu soo bandhigay erayo, tibaaxo, sifayn xaalado iyo sawirro dadka caadi ahaan la foolxum. Sida qaalibka ah waxa daqku jecelyahay in qurux iyo xarago laga hadlo ama la muujiyo. Hase yeeshee si looga hortago foolxumooyin bulsheed ee sii tira badan, caafimaad darrana ilahoodu yihiin, aaya lagama maarmaan ka dhigtay in buugga lagu soo bandhigo tusaalooyin dadka qaarkood u arki karo lama jeclaystaan.

1

## SIYABAHA CUDURRADU JIRKA U GALAAN

---

*Dhawr siyood bay cudurradu u haleeli karaan jirka.*

*Inta badan waxay cudurradu jirka ka galaan daloollo dabiici ah.*

*Waxa kaloo jira qaar ka gala maqaarka dhaawacan ama fayow.*

Tusaalooyin:

### INDHAHA

*Cudurrada indhaha ku dhaca waxa ka mid ah daaf*

### SANKA


*Sanku waa marin ay jirka u maraan cudurrada sida qaaxda, hargabka ama duraygu.*

### AFKA

*Cunnada iyo cabbidda ama neefsashada waxa ka yimaada cudurro sida:*

- shuban
- hargab
- daba-dhiig ama axal dhiig
- qaaxo.

## Meelaha jirrooyinku jirka ka galaan



## KAADIMAREENKA

Kaadimareenka waxa ku dhaca cudurro sida:

- kelyo xanuun
- cudurrada kaadihaysta.

## HABDHISKA TARANKA

Habdhisika taranku waa dhammaan xubnaha ku shaqo leh dhalmada.

Cudurrada ku 'dhaca habdhiska taranka waxa ka mid ah:

- jabto ama gale
- xabbad ama waraabow.

Waxa kaloo jira cudurro jirka ka gala haragga ama maqaarka.

## TUSAALOOYIN:

## KAADIDHIIG

Kaadidhiig waa cudur uu keeno dixiri toos jirka u gala. Waxa kaloo jira cudurro kale oo jirka ka gala haragga iyo maqaarka.

## DUUMO

Duumadu waa cudur laga qaado qaniinyada kaneeco gaar ah.

## TEETANO

Teetanadu waa cudur ka dhasha nabarrada aan la nadiifin.

Jirrooyinka jirka u mara afka:

*ameebe iyo shuban iyo dacuun iyo*

*qooryaan-mullaaxeed iyo mas-calookeed*

*iyo dabayl*

ka gala afka  
iyo sanka:

*qaaxo iyo kix*

ka gala maqaarka

*kaadidhiig iyo*  
*duumo*

ka gala nabarrada  
furan:

*teetano iyo reybis*

ka gala cagta:

*qooryaan-jillaabeed*  
*iyo reybis*

ka gala indhaha:  
daaf

2

## JIRKU SIDA UU JIRROYINKA

### ISAGA DAAFACO

*Jeermiga cudur-sidaha ahi dadka kama foga.  
Waxaa looga nool yahay jirka oo iska daafaca.  
Wuxuu jirku isku ilaaliyaa:*

### MAQAARKA ADAG

*Jeermiyada intooda badani ma geli karaan  
maqaarka adag.*

*Marka la mayranaayo waxaa biyaha raaca  
jeermi badan.*

### CALYADA AMA DHAREERKA

*Calyadu waxay dišhaa jeermi badan, afkana  
wey nadiifisa.*

*Qofka asqoobaa wuu carrab engegaa.*

*Wey fududdahay sida jeermi ku galo afka qof  
uu carrabkiisu engegey.*

### ILMADA

*Ildudu waxay dishaa jeermi badan.  
Waxayna dhawrtaa fayada indhaha.*

### TIMAHА SANKA DULKIISA

*Timaha sanku waxay reebaar. jeermi badan.  
Jeermigaasi wuxuu u gudbi lahaa sambabada.  
Timaha sanku waxa kaloo ay reebaan boodhka.  
Jeermi ayaa la socda boodhka.*

## DHECAANKA CALOOSHA

Caloosha waxaa ku jira dhecaan.

Dhecaanka calooshu wuxuu dilaa jeermi badan.

Jeermigaasi waxyeello ayuu jirka  
u geysan lahaa.

## XINJIRAYSIGA

Waa fududdahay si uu jeermi u galo  
nabar furan.

Nabarkii cusub waxaa daboola xinjir.

Xinjirtu waxay jirka iska hortagtaa wasakhda  
iyo jeermiga iyo dhiig-baxa.

## XANFAFKAA KAADIDA

Jeermiga qaarkii kuma noolaan karaan  
kaadida. Kaadida ayaa gubta.

## DHIIGGA

Dhiigga qofka nafaqaysan waxa ku jira  
oo ku badan unugyo shaqadoodu tahay in ay  
la dagaallamaan jeermiyada jirkiisa soo gala.

3

MEELAHA CUDURRADU SIDA SAHLAN

=====

UGA FAAFAAN

=====

Cudurrada la isqaadsiiyaa waxay ka faafaan  
meelaha dadka badani isugu yimaado.

- 8 -

Goobaha kulanka dadka waxa ka mid ah:

- *dugsiyada*
- *maqaayadaha*
- *biibitooyinka*



*Ardayda dugsiyada waxa  
jeermiga ku faafiya qufaca  
lyo hindhisada*

2




*Jeermiga wuxaa dadka ku  
faafiya cuntada makhaayadaha*

Cudurrada meelahaas lagu kala qaado  
waxa ka mid ah:

- *qaaxada*
- *hargabka*
- *xiiq-dheerta*
- *gooryaannada*
- *shubanka*


*Waxa kaloo cudurradu ka faafaan:*

- *biyaha lagu saxaroodu*
- *biyo fariisinnada lagu qubaysto*
- *biyo fariisinnada lagu mayro dharka*
- *cuntada la wadaago*
- *weelka keliya ee wax lagu wada cabbo musqulaha aan la nadiifin*
- *suuqyada hilibka iyo khudaarta*



*Xooluhu waxay  
wasakheeyaan biyaha*

4



*Suuqu waa in uu  
noqdaa nadiif*

5

- 10 -

*Qof keliya oo buka ayaa dad badan sadhayn kara ama cudur qàadsiin kara.*

*Qofka bukaa waa in uu isdhawraa.  
Sababtu waxay tahay:*


- *Candhuufta uu tufo qofka bukaa waxay faafisaa cudurro sida qaaxada.*
- *Qufaca qofka buka waxaa ka faafa cudurro sida hargabka.*
- *Gacan qaadka qofka buka waxaa ka faafa cudurro sida isnidaamiska.*



6



7



8

*Weel wax ha lagu wada cabbo waxay ka dhigan tahay ha la wadaago jeermi.*

Maqaayadaha aan weelkood la nadiifin  
waxa ka faafa cudurro sida:

- *shuban*
- *daacuun*
- *hargab.*



In wax la wada cunaa fiican,  
cudur baase ka faafi kara


9

Biyaha la cabbo haddii lagu kaadsho ama  
saxaro gaarto, waxa laga qaadaa cudurro sida:

- *xundhursta*
- *kaadidhiigga*
- *gooryaannada*

(eeg sawirka bogga soo socda ee 12)

Kaadidhiig:



Kaadidhiig-qabaha  
waxa kaadidiisa soo raaca ukumo

10

4

TALLAAL  
=====

Tallaal waa hab lagaga hortago cudurrada halista ah ee deg-degga u faafa.

Cudurrada faafa ee tallaal u bahaan waxa ka mid ah:

- qaaxada
- daacuunka
- teetanada
- furuqa
- kixda
- dabaysha ama gallalka

iyo kuwa kale.

Jirka qof tallaalani wuxu awood u leeyahay  
in uu iska celiyo cudurkii laga tallaalay.



Tallaalka  
irbadda ah

11



Tallaalka  
afka laga qaato

12

Tallaal kastaa wuxuu cudurka hor istaagi  
karaa ilaa iyo muddo u go'an.

Lagama yaabo in uu kugu dhaco cudur aad  
iska tallaashay.

Tallaalku waa lacaq la'aan.

Mar haddii uu tallaalku faa'iidooyinkaas  
leeyahay ma'aha in laga baqo ama laga wahsado.  
Mana aha mid ay waxyaabo kale kaa horistaagi  
karaan.


Saarka ama mingiska iyo wadaadadu ma'aha  
kuwo iska kaa hortaagi kara tallaalka.

Hooyada urka lehi waxay u baahantahay  
tallaalka cudurka teetanada si ay:

- ilmo fayow u dhasho
- nafteedu u badbaaddo.

Waa lagama maarmaan in carruurta la geeyo  
isbitaalka xannaanada hooyada iyo dhallaanka  
si loo tallaalo.

Habdhiska wareegga dhiigga



*Sawirka 13: Tallaalka irbadda ah ka dib waxa  
dhiiggu dheecaankii tallaalka u qaadaa jirka  
oo idil.*

## XIIQ-DHEER

*Saddex jeer ayuu ilmuu u baahan yahay in laga tallaalo xiiq-dheer.*

*Laba bilood marka uu jiro ayaa la tallaalayaa.  
Saddex bilood marka uu jirana waa la tallaalayaa.*

*Afar bilood marka uu jirana waa la tallaalayaa.*

## QALLAL

*Afka ayaa ilmaha laga siiyaa tallaalka.  
Saddex bilood oo isxiga ayaa ilmaha la sisyaa tallaalka.*

*Waxaa habboon in aan ilmaha naaska la nuujin muddo laba saacdood ah ka dib marka gallalka laga tallaalo.*

## QAAXO

*Garabka midig ayaa mar keliya laga mudaa ilmaha.*

*Ilmuu marka uu dhasho iyo marka uu weynaadaba waa laga tallaali karaa qaaxda.*

## TEETANO

*Carriurta 12 bilood ka weyn iyo dadka waaweynba waa laga tallaalaa.*

*Saddex bilood oo isku xiga ayaa la iska tallaalaa teetanada.*

*Sannad ka dibna waa la iska tallaalaa.  
Toban sano ka dibna mar baa la iska tallaalaa teetanada.*

*Qalabka tallaallada kala duwan:*



14



15

## JADEECO

Mar ayaa garabka laga tallaalaa carruurta  
da'doodu u dhaxyeyso siddeed bilood ilaa  
14 bilood.

5


A M E E B E  
=====

*Ameebe waa nafley yar-yar.*

*Ameebuhu waa ka duwan yahay gooryaanka.*

*Ameebuhu waa ili-ma-aragto.*

*Waxa lagu arki karaa qalab wixii yar  
weyneeyaa oo laga helo isbitaallada*



Muuqaalka ameebaha  
oo aad loo weyneeyey

16



Qalabka aragga  
bakteeriyada  
lagu weyneeyo

17

Ameebuhu waa nafley aad u tarma, sida uu u  
dhintaana adagtahay.

Wuxuu badiba dadka ka gala mindhicirka.

Mararka qaarkood wuxuu galaa beerka.

Boog malax leh ayuu u yeelaa beerka.

## SIDA LOO QAADO AMEEBAHA

Ameebaha ayaa qofka ka gala afka ama sanka.

Wuxuu raacaa candhuufta ama luq Madda ama  
cabbitaanka.

Wuxuu markaas tagaa caloosha.

Caloosha wuxuu uga gudbaa mindhicirka.

Halkaas ayuu degaa kuna tarmaa.

Boogo ayuu u yeelaa mindhicirka.

Dhiigga qofkana wuu jaqaa.

Muddo ka dibna wuxuu raacaa saxarrada.


Kamase dhammaado mindhicirka.

Iyadoo la dilo oo keliya ayaa lagaga  
dhammayn kara mindhicirka.

## Habdhiska Dheefshiidka

*Habdhiska dheefshiidka waxa ku dhaca cudurro badan. Habdhiskani wuxuu ka kooban yähay:*


1. afka,
2. hunguri madoobaha,
3. caloosha
4. xiidmaha
5. maroorka ,
6. beerka



## SIDA AMEEBUHU U FAAFO

Ameebaha waxa laga qaadi karaa:

- cabbidda biyo ay faddaraysay saxaro qof ameebe ku jiro,
- taabashada iyo cunto la wadaagga qof ameebe qaba,
- iyada oo la cuno soor uu isku taagay duqsi ameebe sida,
- hawada ama dabayl wadda ameebe oo sinka ama afka ka gasha qofka.



20

Duqsiga iyo baranbaradu waxay faafiyaa cudurro

Meelaha uu ameebuhu inta badan ka faato waxa ka mid ah musqulaha ay weelasha yaalla ku astajoodaan dad ameebe qaba.

Waxa kaloo uu ka faafaa qullataynnada masajidada ee dadku kaga weeso qaato gacmaha ama daasado.

## ASTAAMAH A LAGU GARTO QOFKII

### QABA AMEEBE

*Qofka ameebe qaba waxa lagu arkaa:*

- *xundhur aan joogto ahayn,*
- *calool-majiir,*
- *saxaro jilicsan oo biyo leh,*
- *saxaro axal ama dhiig leh.*

*Ameebe kali ah ma aha waxa keena xundhur.*

*Sidaas darteed waxa lagama maarmaan ah in la baaro saxarada si loo ogaado waxa keenay cudurka.*


### KA HORTAGGA

*Arrimaha soo socda ayaa lagaga hortegi karaa ameebaha iyo deris-ku-noosha la nooc ah:*

- *in la ilaaliyo nadaafadda guud ee degaanka,*
- *in musqulo la isticmaalo,*
- *in la ilaaliyo nadaafadda meelaha biyaha laga cabbo ama lagu kaydiyo,*
- *in faraha la mayro marka la saxaroodo iyo inta aan wax la cuninba,*
- *in la iska jiro duqsiga, cuntadana la daboolo had iyo jeer,*
- *in la mayro khudaarta iyo miraha inta aan la cunin,*
- *in qofkii qoyska ka mid ah ee lagu tuhmo ameebe la tuso takhtar si looga baaro oo haddii Jaga helo looga daweyyo.*

*(eeg sawirka bogga soo socda ee 21)*

Hababka looga hortago cudurrada la  
xiriira cuntada.



Tisticmaal musqul leh

- ded
- derbiyo
- dalool
- meel lagu istaago
- ku shub nuurad  
ama deeb.

Musqusha sii fiicani  
waxay leedahay dabool  
la saaro daloolka.



Sida loo dhiso musqul  
fiican eeg lifaaqa  
kowaad.

21

22

Nadafaaddu waxay kahortagtaa cudurro badan



Gacmo mayro  
musquusha ka dib

23



Mayr khudaarta iyo  
miraha inta aan  
la cunin

24



Ku miir biyaha  
maro nadiif ah

25




Biyo karkarsan oo  
kaliya aaya cabbid  
ku habboon

26



*Dabool cuntada*

27



*Cuntada ku kaydi  
meel daboolan*

28

*Haddii goyskaaga  
iyo derisku kaa  
kaalmayn karin:*



*U tag takhtar*

6

SHUBAN IYO XUNDHUR

=====

*Qofka ay calooshu soconayso ama shubmaayaa wuxuu dhigaa saxaro jilicsan oo biyo badan.*

*Haddii saxarada lagu arko axal ama dhiiq markaas waxa qofka haysa xundhur ama dabadhiig.*

*Shubanku wuxuu ku badan yahay carruurta yar-yar.*

*Wuxuu ku sii badan yahay carruurta nafaqo xumadu haysu.*

*Shubanku waa laba nooc:*

- mid qofka ku soo booda iyo
- mid muddo jiitama.


*Wuxuu kaloo noqon kara:*

- mid khatar ah ama
- mid sahlan.

*Shubanku khatarta ahi takhtar deg-deg ah ayuu u baahan yahay.*

*Shubanka sahlan waxaa lagula tacaali karaa guriga.*

*Waa ay fududdahay si qof shuban ama gooryaan qabaa uu u qaadsiyo qoyska oo idil*



## SABABAHA KEENA SHUBAN

*Sababo badan ayaa shuban keeni kara  
waxaana ka mid ah:*

- \* *nafaqo xumo*
- \* *hargab calookeed*
- \* *ameebe*
- \* *gooryaanno*
- \* *duumo*
- \* *cunto sumaysan*
- \* *caanaha oo aan caloosha ku hakan*
- \* *cuntada ku cusub caloosha*
- \* *waxyaabaha caloosha socodsiiya*
- \* *cuntada duxdu ku badan tahay*
- \* *hilibka barruurta badan*
- \* *miraha ceerin.*

## KA HORTAGGA SHUBANKA

*Shuban iyo nafaqo xumo way is wadan.*

*Shubanku wuxuu keenaa nafaqo xumo.*

*Nafaqo xumana waxay qofka u nugleysaa shuban.*

*Haddii nafaqo xumada laga hortago waxa  
kaloo laga hortagay shuban.*

## WAXAA SHUBAN LAGAGA HORTEGI

### KARAA LABA SIYAABOOD:

1. Nadaafadda oo la daryeelo.

Tusaalooyin:

- *Dadka deggan oo musqulo ama suuli  
isticmaala.*

- *Dadka reer guuraaga ah oo saxarada kala fogaaada guriga ka dibna saxarada aasa.*
  - *Biyo nadiif ah oo la cabbo.  
Haddii biyo nadiif ah la waayo,  
waa in la kariyaa biyaha.*
  - *Cuntada oo laga ilaaliyo duqsiga iyo wasakhda.*
  - *Qofka shubmaaya oo weel gaar ah wax lagu siiyo.*
2. Cuntada qof ku shubmo oo aan lagu sii wadin.

### KA HORTAGGA SHUBANKA CARRUURTA

*Arrimaha soo socda ayaa ah kuwa ugu muhimsan ka hortagga shubanka carruurta:*

- *carruurta oo aan naaska laga deyn,*
- *soorta ilmaha ku cusub ha loo siiyo so tartiib tartiib ah,*
- *ilmuhu yaanu wax wasakh leh afka gelin,*
- *soorta adag ee ilmaha la siinayo yaanay hooyadu u calalin,*
- *agagaarka ilmuhu ha noqdo nadiif.*

### LATACAALKA

*Latacaalka waxa saldhig u ah in la horistaago nafaqo darrida shubanku keenayo iyo biyo beelka jirka.*

## Cuntada la siinayo qofka shubmaya

*Qofka shubmayaa  
haddii uu matagayc  
ama ay wax liqisti  
ku adag tahay  
ha la siiyo:*

- shaah
- fuud bariis
- falfalliir
- maraq aan heen  
lahayn
- milanka surmi-  
tirka ama  
asko-tirka.

*Wax cabbidda ka  
sokow, haddii gofka  
shubmaayaa wax  
cuni karo, ha la  
siiyo cunto nafago  
leh oo aanu ku sii  
shubmayn.*

*Qofka xoog u shub-  
mayaa wuxuu  
u baahan yahay:*

- biyo badan oo la cabsiiyo iyo
- milanka surmi-tirka.



*Hunqaacadu waa  
wanaaqsan tahau mararka  
jirku u baahan yahay  
inuu sun ama bakteriya  
iska soo saaro.  
Matag joogsan waayaa  
wuxuu calaamad u  
yahay jirro khatar ah.*

Sida loo sameeyo milanka surmi-tirka  
ama asqo-tirka:

Tallaaboooyinka soo socda ayaa loo raacayaa  
diyaarinta milanka asqotirka:


1. *Afar bakeeri oo biyo ah waxaad ku shubtaa kirli ama digsi.*
2. *Laba qaaddo ama laba malqacadood oo sokor ama malab ah ku shub biyaha.*
3. *Qaaddada marka afar meelood laga dhigo meesheed oo milix ah ku dar biyuunii aad kirliga hore ugu shubtay.*
4. *Kari biyaha aad ku dartay sokorta iyo milixa.*
5. *Kirliga dabka ka qaad marka ay biyaha iyo sokorta iyo milixu isla karaan.*

BIYAHА iyo SOKORTA iyo MILIXA  
oo isku jira, waxaa la yiraahdaa milanka  
surmi-tirka ama asqo-tirka.


*Marka uu qaboobo milanka asqotirku, waxaad siisaa qofka shubmaya.*

*Inta uu qofku shubmayo ama asqo ka muuqato yaan milanka laga dayn.*

Sida loo diyaarsho milanka asqo-tirka




*Soo diyaarso afar  
koob oo biyo ah*




*Laba qaaddo oo sokor  
ah koob ku shub*

32

33



*Ku dar qaaddo  
afارتید meelood  
meel milix ah*




*Sokortii, milixii  
iyo bijihii iskula  
shub kirli oo qas*

34

35



*Kar-kari*



*Milinka sii gofka  
shubmaya*

36

37

*Qofka in jirkiisa biyuhu ku yaraadeen waxa  
lagu garanayaa:*

- far iyo suul ku qabo qofka shubmaya  
jirkiisa oo kor u jiid,
- haddii haraggii kor loo jiiday uu durba  
halkiisii ku noqon waayo qofkaasi waa  
surmiyey.


*Yaan la sugin inta qof shubmayaa surmiyayo.*

*Waxaa takhtarka lala kaashanayaa marka la arka:*

1. Shuban qarmuun oo xoorinaya.
2. Shuban u eg biyo bariis.
3. Shuban dhiig leh.
4. Shubanka uu keeno:

- dhego dillac
- qumanka ama xoqadaha ama
- kaadi-mareenka oo jirran.

*Carruurkani  
muddo dheer  
ayuu  
shubmayey*



38

7

## D A A C U U N =====

*Daacuunku wuxuu ka mid yahay cudurrada  
deg degga u faafa.*

*Waa cudur ku dhaca mindhicirka.*

*Sidaas darteed waxaa loo yaqaan daacuun  
calooleed.*

Boqolkii gof ee uu ku dhaco waxaa u dhinta konton iyo in ka badan.

Haddiise si habboon loola tacaalo wuxuu dilaa tiro aad u yar.

### ASTAAMAHAA CUDURKA

Cudurku wuxuu leeyahay astaamo.

Waana kuwo lagu malayn karo cudurka.

Astaamahaasi waxay yihiin:

- shuban
- matag
- jirka oo biyuhu ka baxaan
- miyir beel.

### KA HORTAGGA CUDURKA

Cudurka waxaa lagaga hortagi karaa:

- In la iska tallaalo.  
Lixdii biloodba mar ayaa la iska tallaala dacuunka.
- In biyo nadiif ah la cabbo.  
Biyaha waxaa lagu nadiifin karaa iyaado la kariyo inta aan la cabbin.
- In lagu dadaalo nadaafadda cuntada.  
Cuntada la bisleeyo si fiican ha loo kariyo.  
Khudaarta ha la mayro inta aan la cunin.  
Caanaha yaan la dabool tirin.
- In lagu dadaalo nadaafadda jirka.  
Ha la mayrto.



*Badiba gacmo dhago*

39



*Dabool cuntada*

40

*Dharka ha la mayro.*

*Ha la fara xasho cuntada ka hor iyo ka dib.*

- *Saxarada ha la asturo.*

*Waxa fiican in musqulo la isticmaalo.*

*Haddii meel bannaan lagu saxaroodana waxa habboon in la aaso.*

- *In dadka qaba cudurka la karantiimeeyo lana xannaaneeyo.*

- *In aan cudurka la qarsan.*

*Meesha uu ka dillaaco si deg deg ah ha loola socodsiiyo Wasaaradda Caafimaadka.*

## LATACAALKA DAACUUNKA

*Qofka daacuun ku dhaco ha la siiyo 'milanka surma-tirka'.*

*'Milanka surma-tirku' wuxuu ka kooban yahay BIYO, SOKOR iyo MILIX. Intaaš yaan lagu deyn. Si deg deg ah ha loo geeyo isbitaal.*


## G O O R Y A A N N O

---

*Waxa jira gooryaanno ama xayawaanno yar-yar oo badan oo ku noolaada mindhicirka dadka, cudurrana ku dhaliya.*

*Kuwa waaweyr waxa mararka qaarkood lagu arkaa saxarada.*

*Daris-ku-nooshaas kuwa ugu caansan ee mindhicirka gala waa kuwa hoos ku sawiran.*



### GOORYAAN - MASEED

41

*Gooryaanku wuxuu u eg yahay isskabaalka ama ciidgalaha, wuxuu dherarkiisu garaa 20 sentimitir ilaa 30 sentimitir.*

*Midabkiisu waa caddaan ama casuur.*

*Sida uu u faafo gooryaanku:*

*Waxay ukunta gooryaanku ka tagtaa saxarada qofka qaba waxayna gashaa afka qofka oo uga gudubtaa mindhicirka.*

*Waxyellada uu gooryaanku caafimaadka u leeyahay*

*Ukunta la liqay waxay u dillaacdaa tixri, kaas oo raaca xiddiddada dhiigga;*

waxa laga yaabaa in markaas qofku dareemo cun-cun guud ee oogada ah.

Tixirigaas dhaladka ahi wuxuu u gudbaa sambabada, isagoo mararka qaarkood keena qufac engegan, ama marka uu ugu daran yahay oofwareen uu qofku dhiig qufaco.

Tixiriyada dhaladka ahaa ee u qofacay ayuu qofku dib u liqaa, dabdeedna waxay u gudbaan mindhicirka halkaas oo ay ku qaangaaraan.

Haddii gooryaanku ku bataan mindhicirka carruurta waxay keenaan:

- dheefshiid la'i
- tabar darro
- uur weynaad,

marar dhif ah ayaa laga yaabaa inay keenaan neef, suuxdin ama inay xiraan hunguri madoobaha.

Marka carruurku xumad lee yahay, waxay u badan tahay in gooryaanadu soo raacaan saxarada amase ay ka soo baxaan sanka iyo afka.

Mararka qaarkood waxay raacaan neef mareenka oo margis keenaan.

## KA HORTAGGA

Waxa qaadista gooryaanno looga hortagi karaa:

- iyadoo la isticmaalo musqulo,
- iyadoo la gacmo dhaqdo ka hor cuntaynta iyo cunto ka shaqeeynta,
- iyadoo duqsiga laga dhawro cuntada, iyo
- iyadoo la raaco dhammaan caadaadka nadaafad ilaalinta.

## LATACAAL

*Ha la tuso gofka takhtarka  
si loogu qoro dawo.*

*Dadku waxay kula tacaalaan  
babaay.*

*Babaayga waa lagula  
dagaallami karaa  
mas-caloooleedyada, inkasta  
oo aanay dawooyinka  
casriga ah gaarayn.*

*Sidan ayaa loo diyaarshaa  
milan babaayeedka:*

*Saddex ilaa afar qaaddo  
oo caano babaay ah ka soo  
lis mirta ceeriin ama  
dhumucda geedka oo la saray  
dabadeedna ku qas koob  
biyo kulul ah.*

*Haddii ay suurtogal tahay ha  
lagula cabbo milanka dawo  
caloosha jilcisa.*



42

## IDIINYO AMA MAMAC

*Idiinyo waa tixiri yar-yar oo dheerarkoodu  
yahay hal sentimitir (1 sm),  
midabkooduna cad yahay.*

Sida idiinyadu u fiddo:

*Idiinyadu waxay ka soo baxdaa futada.*

*Ukumo kumayaal ah ayuu tixirigu dhigaa  
futada qarkeeda.*

*Tixirigu waa cun-cun badan yahay,  
gaar ahaan habeenkii.*

Marka qofka **isfareeyo** ama **isxogo** ayaa  
waxa farihiisa **iyo ciddiyaha** hoostooda  
soo raaca ukumo, kuwaas oo raaca cuntada  
ama afafka dadka **si uun u gaaraa dabadeedra**  
**tixiriga laga qaado.**

Waxyeelka idiinyadu u leedahay caafimaadka:

**Tixiriganu khatar ma aha, cun-cunka uu**  
**leeyahay baa dadka dhiba carruurtana**  
**hurdada u diida.**

### KA HORTAGGA IYO LATACAAL

- *Ilmaha idiinyada qaba ha loo geliyo surwaal habeenki si aanu isku xoqin.*
- *Astajo iyo gacmo mayrista ha loogu dadaalo ilmaha.*
- *Mar walba ha laga beddelo dharka, hana loomayro.*
- *Sabaad ha loogu dhayo futada, si cun-cunku uga joogsado.*
- *Dawo takhtarku u qoro ha la siiyo.*
- *Ka hortagga ugu habbooni waa iyadoo aad **loo Haaliyo** nadaafadda. Tixirigaasi wuxuu noolaan karaa 45 maalmood.*  
*Nadaafad baa lagu baabi'n karaa iyadoo aan dawo la qaadan.*

### GOORYAAN - FIDSANE

*Gooryaan-fidsanaha waxa dhererkiisu gaaraa ilaa shan sentimitir (5 sm), midabkiisuna waa bay.*

Waxa uu u faafaa sida gooryaanka caadiga ah oo kale. Waxyelladiisu waa yar tahay, hase yeeshiee wuxuu keenaa shuban, carruurta qabta waxa ka soo dhaca maroorka.

### KA HORTAGGA IYO LATACAAL

Waxa looga hortagaa sida looga hortago gooryaanka caadiga ah si la mid ah.

Haddii dhibaato weyn uu keeno, aofka ha la tuso takhtar.

Marka maroorku ilmaha ka soo dhaco, si loogu celiyo, foorari carruurka oo biyo qabaw futada uga shub si ay xiidmaha u qaboojiyaan.

### GOORYAAN - JILLAABEED

Dhererkisu wuxuu gaaraa hal sentimitir (1 sm) midabkiisuna waa gaduud.

Gooryaan-jillaabeed laguma arki karo saxarada.


Si loo ogaado waxaa loo baahan yahay in lagu hubiyo shaybaar.

**Sida uu u faafo:**

1. Gooryaan yar baa gala qofka cagahiisa cad. Waxa uu qofku dareemi karaa cun-cun.
2. Dhawr maalmood gudahood bay ku gaaraan sambabaha iyagoo raacaaya xiddidada. Waxa qofka lagu arkaa qufac engeegan.
3. Qofku wuxuu qufacaa tixiriyyada oo dabadeed dib u ligaa.

4. Dhawr maalmood ka dib ayaa qofku-iskū arkaa shuban iyo calool xanuun.
5. Waxa uu gooryaan-jilaabeedku qabsadaa derbyada mindhicirka. Haddii ay baalaaan waxay keenaan dhiig yari iyo tabarudaro.
6. Ukumaha gooryaanku waxay raacaan saxarada waxayna ku dillaaci og yihin carrada qoyan.

## SIDA UU U FIDO GOORYAANKU OO SAWIRAN



4. *Dhawr maalmood ka dib baa qofku shubmaa, calool xannuunna dareemaa.*
5. *Gooryaan-jillaabeedku wuxuu qabsadaa darbiyada caloosha. Haddii ay caloosha ku bataan waxay keenaan tabar-darro iyo dhiig-yari.*
6. *Ukunta gooryaanku waxay raacdaa saxarada qofka. Waxay ka dib ku dillaacdæa meelaha qoyan.*

*Gooryaan-jillaabeedka oo la qaadaa waa jirro aad khatar u ah siiba carruurta u daran. Haddii carruurta dhiig-yari ka muugato ama uu wasakhda cuno, waxaa suurta gal ah inuu gooryaan-jillaabeed qabo. Sidaas darteed waa in laga baaraa ilmaha.*

### LATACAAL

- *Qofka lagu tuhmo gooryaankan ha la tuso takhtar si looga baaro oo haddii laga helo dawo loogu qoro.*
- *Carruurta qabta gooryaankan ha loogu roonaado cunto aad u nafaqo badan oo uu beer ka mid yahay.*

### GOORYAAN - MULLAAXEED

*Gooryaan-mullaaxeed wuxuu ku noolaadaa mindhicirka, waxaanu dhererkiisu gaaraa dhawr mitir.*

*Mararka qaarkood waxaa dadka qabaa maryahooda ku arkaan xubno dhererkoodu yahay hal sentimitir (1sm) oo ka soo go'ay gooryaanka weyn.*

Sida loo qaado:

*Waxa gooryaan-mullaaxeedka laga qaadaa cunista hilibka lo'da iyo hilibka kale ee ceeriinka ah.*


Waxyeellada uu u leeyahay caafimaadka:

- *Wuxuu leeyahay calool xannuun.*
- *Khatartiisa weyni waa marka uu nooca isdahaaraa uu galo maskaxda, taasina waxay dhacdaa marka ukumaha saxarada soo raacaa ay qofka afka ka galaan.*

### KA HORTAGGA IYO LATAAAL

*Iska ilaali hilibka ceerinka ah.*

*Waxa loo baahan yahay baaris iyo talo takhtar iyo daawooyin uu qoro.*



9

D U U M O  
=====

Duumo waa cudur ay faafiso kaneecada ama dhilmaanyada. Kaneecada dhedig oo kaliya ayaa faafisa cudurka duumada.

Qofka ay hore duumo ugu dhacday waxaa dhiigiisa ku jira jeermi duumo ama deris-ku-nool.

Kaneecada dheddigi waxay jeermiga ama deris-ku-noosha ka qaaddaa qofka noqday qol duumo. Waxaanay deris-ku-noosha ku tallaasha qof fayow.

Kaneecada dheddigi waxay ku dhashaa biyo fariisannada. Waxaanay markiiba dhashaa ukumo badan.

Maalmo ka dib ayey ukumuuhu dillaacaan. Wuxaan ukun walba ka dhex baxa lulumo. Lulumadu waxay timaadaa oogada biyaha. Madaxana waxay ka saartaa biyaha.

Waxay markaas raadineysaa hawo.

Haddii biyaha la daaro waxay markiiba u dabaalataa hoos.


Dadka qaarkiis waxay lulumada kaneecada u yagaaniin 'miro-xareed'.

Muddo yar ka dib lulumadu wey duubantaa waxayna gashaa dhaaar.

Markaas waxaa la yiraahdaa dillaac-suge. Waxaanaha dhaarkaas ka baxa kaneeco ay xubnaheedu u dhan yihiin.

(eeg sawurka bogga soo socda)

## MEERTO-NOLOLEEDKA KANEECADA




Dillaac-suge

Kaneeco

## KA HORTAGGA

*Arrimahan ayaa lagaga hortegi karaa duumada:*

- *Seexo meel aan kaneeco lahayn.*
- *Go'aaga ama maro kaneeco xiro habeenkii.*
- *Aas hogoga ay biyahu fadhiistaan ee kaneecadu ka dillaacdoo.*
- *Baraagaha iyo harooyinka waa in lagu beeraa kalluun.*  
*Kalluunku waa nooc ku noolaada biyaha macaan.*  
*Wuxuuna cunaa lulumada kaneecada.*
- *Dhulka u baahan in la buufiyo waa in lala socodsiiyaa laamaha ka hortagga duumada.*



*Dawada kahortagga  
oo la qaato*




*Baraagäha ku beer  
kalluun cuna  
lulumada kaneeco*



*Qolalka oo la buufiyo*

48



*Maro-kaneeco ama sansayeri oo la xirto*

49



*Xabaal biyo-tariisannada.  
Dabool weelka biyaha.*

50

10

Q A A X O  
=====

*Qaaxadu waa cudur aad u daran.*  
*Waa cudur dad badan inaga laayey.*  
*Dadkeenna qaarkiisna iminka ayuu hayaa.*  
*Waase cudur laga hortagi karo lana*  
*daaweyn karo.*  
*Badiba wuxuu cudurku ku dhacaa sambabada.*

*Sambabada ka sokow wuxuu ku dhacaa:*

- *lafaha*
- *qanjirada*
- *kelyaha iyo*
- *maskaxda.*

*Lama dhaxlo qaaxada ee waa la kala qaadaa.*  
*Waxaana qaada qof uu jirkiisu u nugul yahay.*  
*Waxaa cudurka sababa jeermi.*  
*Jeermigu wuxuu soo raacaa neefta bukaha.*  
*Jeermiga qaaxadu wuxuu kaloo soo raacaa:*

- *xaakada qaaxo qabka*
- *duufka qaaxo qabka*
- *faraha qaaxo qabka*
- *dharka qaaxo qabka.*


ASTAAMAH A CUDURKA

- *xummad joogta ah*
- *daal joogta ah*
- *qufac badan*
- *miisaanka qofka oo hoos u dhaca*
- *oon diidnimo*
- *laab xannuun*
- *dhidid badan oo habeennimo*
- *xabeeb.*

## MAXA LA GUDBOON QAAXO QABKA

*Qaaxo qabka waxaa la gudboon:*

- *in uu isdaweeyo, dawadana u qaato sida takhtarku ku la taliyo sidaas ayuu ku bogsoone.*
- *in uu cunto nafaqo leh cuno*
- *in uu nasto*
- *in uu ku dadaalo nadaafaddiisa*
- *in uu weel gaar ah wax ku cuno*
- *in uu candhuufta iyo xaakada ku tufo weel gaar ah oo dabool leh*
- *in uu gogol gaar ah yeesho*
- *in uu meel u gooni ah seexdo*
- *in uu sankiisa iyo afkiisaba ku daboolo maro nadiif ah, marka uu qufacayo ama hindhisayo*
- *in uu iska dhawro gacan qaadka dadka.*



*Nin qaaxo qaba*



*Ninkii oo bogsadey maca salaameeyana takhtarkii*

## 11 XIIQ - DHEER AMA KIX

=====

*Kixdu waa cudur ku dhaca carruurta.*

*Badiba wuxuu cudurku ku dhacaa carruurta  
shan sano ka yar.*

*Bilawga cudurka waxaa loo maleeyaa hargab.*

*Qofka qaba waxaa lagu arkaa qandho iyo qufac.*

*Toban maal mood dhexdood ayaa kixda lagu gartaa;  
muddadaas ayaa cudurka xoog loo kala qaadaa.*

### ASTAAMAH A KIXDA

*Kixdu waxay leedahau qufac badan.*

*Habeenki buu qufacu u badan yahay.*

*Qufacaas badani wuxuu ka matajiyaa ilmaha.*

*Ugu yaraan bil ayuu qufucu ilmaha hayaa.*

*Kixdu waxay ilmaha u keeni kartaa:*

- oof-wareen
- dhego- dillaac
- tamar-darro
- dhimasho

*Ilmaha kixda qabaa  
wuxuu u baahan yahay:*

- in la baanto
- nasasho
- talo takhtar

### KA HORTAGGA KIXDA



53

*Waxaa kixda laga hortagi karaa:*

- Ilmaha oo laga tallaalo.
- Ilmaha laba ilaa saddex bilood jirka ah ha lagu bilaabo tallaalka.
- Carruurta aan kixdu weli ku dhicin oo laga dhawro kuwa qaba.

*Jadeecadu waa cudur faafa.*

*Mana aha cudur sahlan.*

*Jadeecada waxa sababa cudur-side la nooc  
ah ka hargabka keena..*

*Carruurta ay ku dhacdo wey dishaa ama  
dirqi ayey kaga kacaan.*

*Waxay badiba dishaa carruurta nafago xumo  
hayso ama cudur kale u weheliyo.*

*Muddo tobان maal mood ah marka ay jadeecadu  
qofka ku maqan tahay ayaa ka dib waxaa  
lagu arkaa:*

- xummad
- duuf
- indho guduud iyo
- qufac.

*Aad bay jirradu  
carruurta ugu  
sii korortaa.*

*Afka ayaa xanuuna  
laba ilaa saddex  
maal mood ka dib ayaa afku finan yeeshaa.*

*Waxay finanku ku soo horreeyaan dhegaha  
ka dib waxaa lagu arkaa lugunta.*

*Waxaa ku sii xiga wejiga iyo saabka.*

*Ugu dambeuntji waxay ka soo baxdaa gacmaha.  
Ilaa shan maal mood ayaa finanku ka muuqdaan  
carruurta.*

*Finanku markay jabaan ayey ilmuhi raysataa.*



## LATACAALKA

- \* *Carruurta hala nasiyo.*
- \* *Jiifka ha badsadeen.*
- \* *Cabid badan iyo cunto nafaqo leh hala siiyo.*
- \* *Caano xoolaad halagu qulaamiyo ilmaha naaska jaqi kari waaya.*
- \* *Yaan la dedin marka ay xummadi hayso.*
- \* *Salaanta halaga saaro maro nadiif ah oo goyan.*
- \* *Asbiriin hala siiyo haddii loo heli karo.*

*Ilmaha lagu arko:*

- *oofwareen*
  - *waalli*
  - *dhega-dillaac iyo*
  - *calool xannuun*
- waa in takhtar la tusaa.*

*Waxaa jira cudurro faafa oo ku dhaca  
xoolaha iyo dadka.*

*Sidaas darteed ilmaha jadeecada qaba  
yaan dhiig loogu qubayn.*

*Ilmaha jadeecada qaba yaan harag kulul  
lahuwin.*

## KA HORTAGGA

- *Carruurta jadeeco qaba ha laga dhawro  
carruurta kale siiba kuwa nafaqo  
xummudu hayso ama jirrooyin kale qaba.*
- *Qoyska carruuri jadeeco ka qabto yaanu  
kuwa fayow u dirin dugsi haddii aanay  
"guri" ahayn, oo aanay hore u qaadin  
cudurka.*

- *Ha la nafaqeeyo carruurta.*  
*Jirrooyin badan bay iska celin karaan carruurta nafaqaysani.*
- *Ha la tallaalo carruurta da'doodu u dhaxeyso seddeed bilood ilaa 14 bilood.*

13

## T E E T A N O

---

*Teetanada waxaa la qaadaa marka jeermiga keena jirka galo.*

*Jeermiga teetanadu wuxuu jirka ka gaataa nabar furan. Dhaawacyada aan la nadiifininna waxay baylah u yihiin teetano.*

*Sababtoo ah waxaa ku dhalan kara jeermiga keena teetanada.*

*Dhaawacyada keeni kara teetanada:*

1. *Qaniinyada xayawaanada ay ka mid yihiin eyda iyo dawacooyinka ayaa teetano laga qaadi karaa.*
2. *Dhaawacuada middiya ha ayaa teetano laga qaadi karaa.*
3. *Irbadaha aan nadiifta ahayn ee dhegaha lagu dalooliyo ayaa teetano laga qaadi karaa.*
4. *Dhaawacyada ay keenaan biruhu sida silingga, masaabiirta iyo midiyaha ayaa teetano laga qaadi karaa.*
5. *Dhaawacyada ka yimaada qodxaha ayaa iyana teetano laga qaadi karaa.*

Sida loo qaado teetanada:



Qaniinyada eyda



Sarmada midd jaha

55

56



Mudidda masaamiirta

57



Mudidda qodxaha



Dalooshiga dhegaha  
ee dumarka


58

59

## ASTAAMAHА TEETANADA

Astaamaha teetanada lagu qarto waxa ka mid ah:

- qofka oo wax ligisto ku adkaato,
- daamanka oo isku dhaga,
- muruqyada jirka oo isku urura,
- qofka oo togma haddii la taabto ama iftiin lagu shido,
- qoorta oo galloocata,
- dhidid badan,
- tamar-darri.



## KA HORTAGGA TEETANADA

Arrimahan soo socda ayaa teetanada looga hortegi karaa:

- Inta aan dhaawac iman oo lays tallaalo.
- Irbadda lidka teetanada oo laysku mudo marka dhaawac ku gaaro.
- Nabarada furan oo lagu meyro biyo kulul iyo sabuun.

14

DABAYL AMA QALLAL

=====

Cudurka dabayshu wuxuu ku badan yahay carruurta da'dooda ka yar laba sano.

Dabaysha waxa sababa cudur-side ili-maqabatay ah.

Wuxuu marka hore cudurka u bilawdaa sidii hargab xammad leh oo kale, wuxuu leeyahay matag iyo murqa xanuun.

*Mararka qaarkood intaas ayuu ku ekaadaa.  
Laakiin mararka qarkood waxa naafooba  
ama tabar darreeya qaybo ka mid ah jirka.  
Inta badan addin ama laba addin ayaa  
naafooba.  
Addinku waa wiiqmaa umana koro sida  
addinka kale ee fayow.*

### KA HORTAGGA

- *Carruurka cudurku haleelay ha laga takooro carruurta kale.*
- *Hooyadu waa in ay gacmo dhaqato ka dib mar kastoo ay taabato carruurka jirran.*
- *Kahortagga ugu wanaagsani waa iyadoo carruurta laga tallaalo cudurka dabaysha.*

*Hubi in aad carruurtaada dabaysha ka tallaasho saddex jeer oo cimrikooda kala yahay laba bilood, saddex bilood iyo afar bilood.*

*Carruurka naafoobay ha la siiyo cunto nafaqo badan.*

*Ha sameeyo jimicsi si ay ugu xoogeystaan murqaha u nocli.*

*Waxa suurtagal ah in xoog ku soo laabto sanadka horeba.*

*Ha lagu kaalmeeyo carruurka in uu si wanaagsan u socod barto.*

*Marka hore ha loo qotomiyo tiirar dabadeedna ha loo sameeyo cuskad.*

*(eeg lifaaqa 3)*

15

R E Y B I S

=====

*Reybis waa cudur ay keenaan qanniinyada eyda, dawacooyinka, yeysda iyo mukulaalaha.*

*Fiidmeertuna way keeni kartaa.*

ASTAAMAH A LAGU GARTO BAHALKA

QABA REYBIS

- *Si aan degenayn oo fir-ka-naxsan ayuu u dhaqmaa.*
- *Mararka qaar wuu waashaa, wixii ku dhawna wuu qaniinaya.*
- *Bahalku wuxuu ku dhintaa shan ilaa todoba maal mood.*

ASTAAMAH A LAGU GARTO QOFKA

QABA REYBIS

- *wax liqidda oo ku adkaata,*
- *candhuufta qofka oo adeyg is-haysata noqota,*
- *xanaaq lama filaan ah,*
- *firko-nax,*
- *qofku wuu dubaaxiya marka naftu ka sii baxayso.*

*Waxqabadka kula gudboon markaad tuhun to inuu bahalka qofka qaniinay qabay reybis:*

- *Adoo naftaada ka ilaalinaya, meel ku xir bahalka todobaad.*
- *Barta uu qaniinay ku mayr saabuun iyo biyo.*

- Ha dedin qoonta.
- Haddii bahalku dhinto todoba maalmood ka hor, qofka u qaad waaxda caafimaadka si loo duro.

## KA HORTAGGA

- Ha la dilo hana la aaso bahalkii lagu tuhmo reybis.
- Ha layska ilaaliyo candhuuftiisa.
- Ha laga digtoonaado bahalada qaada reybiska.
- Qofkii lagu tuhmo in reybis hayo waa in si deg deg ah loo geeyaa isbitaal.
- Bahalka lagu tuhmo reybis waa in todobaad uu meel gaar ah ku xirnaadaa.  
Bahalka lagu tuhmay reybis haddii uu weerar bilaabo waa in la dilaa.



Kaadidhiiggu waa cudur ku badan gobollada koofureed ee waddankeenna.

Waxuu ku sii badan yahay agagaarka webiyada.

Kaadidhiiggu waxuu dadka qaba ka siibaa tamarta iyo firfircoonda.

Wuxuu qofka qaba u nugleeya jirrooyinka kale.

Jirradaas halista ah waxa u sabab ah dixiri yar oo biyaha ku jira.

Daka wuxuu ka galaa oogada sare.

Wuxuu raacaa xididda dhiigga ilaa iyo sambabada iyo beerka.

Mindhicirkä iyo kaadihaysta ayuu ugu dambayn galaa oo ukun dhigaa.

Ukuntu waxay soo raacdaa kaadida iyo saxarada.

Ukuntu waxay isu rogtaa dixiri xaaxeeyo.

Dixirigu wuxuu raadsadaa xaaxeeyo.

Dixirigu kama maarmo inuu xaaxeeyo galo.

Dixirigu wuxuu ka baxaa xaaxeeyada.

Wuxuu dabbaashaa biyaha isaga oo dad raadsi ah.

Astaamaha cudurka:

-- Dhiig yimaada kaadida dabadeed.

-- Mindhicir xanuun.

-- Gumaar xanuun siiba marka ay kaadiidu sii dhammaanayso.

Marka qofka cudurku ku daaho:


-- Kelyaha ayaa dhaawacma ama buro ku dhalataa.

-- Beerka ayaa koga beeryaraduna waa barartaa.




*Biyaha fadhiya waxa ku jira  
dixiri kaadidhiig ee dadka galaa*

61



*Waa dixiriga kaadidhiigga  
sababa*

62



Sawirka 63:


*Wuxuu dixirigu markaladihiisa kala duwan  
ku kala noolaadaa oo waxyeelleeyaa  
sambabada, beerka, mindhicirka iyo  
kaadihaysta oo ugu dambeyn ukumo dhigo.*

## LATACAALKA

- *In qofku qaato cunto aad u nafaqo leh waa lagama maarmaan.*
- *Dawo qofka la siyo oo Takhtarku sida uu ku taliyo loo qaato.*

*Si looga hortago waa in silsiladda nolosha dixiriga meel laga gooyo.*

- *Tabta ugu muhiimsan waa in saxarada iyo kaadida lagala fogaado biyo fariisinnada.*
- *Dadka deggan oo musqulo isticmaala.*
- *Dadka oo aan dhex gelin biyo fariisinnada ama webiyada.*



KA HORTAGGA CUDURRADA

17

LA IS QAADSIIYO


Caadooyin fudud ayaad kaga hortegi kartaa  
cudurro badan:

1. *Gacmo dhaqo saxarada ka dib.*
2. *Gacmo dhaqo cuntada ka hor.*
3. *Candhuuf ha ku tufin dhuuka gaar  
ahaan hoyga.*
4. *Afka iyo sanka dabool markaad  
qufacaysid ama hindhisaysid.*
5. *Ha gacan qaadin dadka*
  - *haddii aad jirran tahay*
  - *haddii qofka kale jirran yahay*
6. *Hadday suuragal tahay muswul  
isticmaal.*
7. *Haddaanay musquli jirin kaadida iyo  
saxarada la tag meel ka durugsan biyo  
fariisinnada iyo webiyada.*
8. *La dagaallan ca jayaanka iyo noolaha kale  
ee cudurrada faafiya.*



KHATAR

*Saxarada kala fogow  
dhabeyaasha*



KHATAR

*Saxarada kala fogow  
biyo fariisinnada*

65

66



KHATAR

*Saxarada kala togow  
sabada aqalka*



*Saxarada kala fogow  
meelahan ama musqul  
isticmaal*

67

68

*iyo: Mar walba gacmo dhaqo*

*Taba kale ayaa iyaguna waxtar leh, laakiin mararka qaarkood aan dad u suuragal ahayn:*

1. *Qofka jirrada faafa qaba ha laga dhawro dadka kale:*
  - *ha la siiyo dermo ama sariir u gaar ah*
  - *ha la siiyo hoy u gaar ah haddii uu aad u jirran yahay.*
2. *Qalabka qofka jirrani isticmaalo aad ha loo nadiifiyo.*
3. *Biyaha karsan ayaa caafimaadka u fiican:*  
*Marka la karkariyo biyaha waxa ka dhinta jeermiska ku jira.*  
*Haddii aanad heli karayn biyo karsan oo la cabbo raadso biyo ceel oo aan xoolo sadhayn ama shaah cab.*  
*Haddii kale waxaad halis u tahay jirrooyinka sida shuban iyo daacuun.*




18

CUDURRADA KU DHACA  
 ======  
 HABDHISKA TARANKA  
 ======

*Habdhiska taranku waa xubnaha dhalmaada ee labka iyo dheddigga. Wuxuu jira cudurro halis ah oo ku dhaca habdhiska taranka ee dadka. Cudurradaas waxaa ka mid ah:*

JABTO

*Jabtadu waa cudur Ɂu dhaca habdhiska taranka ee ragga iyo dumarka. Waana cudur fida oo la kaia qaado. Jabtada waxaa lagu kala qaadaa isu gal moodka ragga iyo dumarka.*



ASTAAMAHAD JABTADA  
 RAGGA:

70

- Kaadida oo xanfaf leh.
- Ibta oo malax lagu arko.
- Kaadida oo dhib ku timaadda.
- Bilo ama sannado ka dib oo barar lagu arko jilbaha ama kalagooqsyada kale.

## DUMARKA

- Cudurka bilawgiisu ma laha astaamo lagu ogaaado. Maxase laga yaabaa in haweynaydu dareento xannuun yar marka ay kaadinayso ama ay dheecaan yar isku aragto.
- Hooyadu uurka leh ee jabto qabta waa in la daweeyaa inta aanay dhaliin. Haddii aan dhalmada ka hor la daweyn waxa dhici kara in indhaha ilmuu saroobaan. Ilmaha ay dhashaana uu noqdo indhoole.

Bilo ama sannado ka dib:

- Waxay xannuun ka dareentaa qaska.
- Dhibaatooyin la xiriira caado-helka.
- Waxaa laga yaabaa in ay madhalaays noqoto.
- Waxa kaloo jira dhibaatooyin kale.

Astaamaha jabtada waxay ragga ku soo baxaan 2 ilaa 5 beri galmaada ka dib. Mararka qaarkood waxaa lagu gartaa in ka badan 3 todobaad. Haweenku hore uma dareemaan jabtada. Waxaa la arkaa in aanay sannad ku dareemin. Sidaa darteed haween aan wax astaan ahi ka muuqan ayaa jabto laga qaadi karaa.

## LATACAALKA JABTADA

- Waxa jabtada u roon irbadaha borokeyn-biniciliin.
- Qofka ay kaadidu ka iman weydo ha ku fariisto weel ay ku jiraan biyo kululi.
- Qofka ha iska ilaaliyo galmaada haddii uu cudurka isku arko
- Ilmaha hooyadii jabto qabta waxaa habboon in markuu dhashaba daawo loogu shubo indhaha. Haddii aan sidaas la yeelin wuxuu halis u yahay indho-beel.

- Haweynayda ka cabata ubuc xannuun ama kaadidu gubto ha aragto takhtar Wuxuu takhtarku hubinayaa in ay jabto hayso iyo in kale.


### FIIRO GAAR AH

Qofka jabti qabaa wuxuu halis u yahay in ay u wehliso so xabbad ama waraabow. Wuxuu ka faafaa laguna kala qaadaa galmodaa ragga iyo dumarka. Isla markaasna qofku kama bogsado waraabow u qarsoon.

### WARAABOW AMA XABBAD

Waraabowgu waa cudur halis ah oo ku badan dadkeena. Wuxuu ka faafaa laguna kala qaadaa galmodaa ragga iyo dumarka.

### ASTAAMAH A WARAAABOWGA



- Bilawga cudurka waxaa la isku arkaa furuuruc ka sco baxa xawada ragga iyo haweenka. Wuxuu furuurucu ku soo baxaa 2 ilaa 5 todobaad ka dib marka loo galmodaa qof waraabow qaba. Mararka qaarkood waxaa furuuruca lagu arkaa afka ama dibnaha ama faraha. Furuurucyadaas waxaa ka buuxa jeermi halis ah oo deg-deg ugu gudbi kara qof kale. Furuurucu ma laha xannuun. Lamana dareemo haddii ay ku dhashaan gudaha haweenka. Waxayse si sahan ku sarayn kartaa qofkii u galmodaa.


- Maalmo yar ayuu furuurucu ku baaba'aa iyadoo aan la daaweyn. Cudurkuse intaas wuu sii fidayaa.
- Todobaadyo ama bilo ka dib waxaa la isku arkaa:
  - \* Cuno xanuun
  - \* Xumad yar
  - \* Af xanuun ama
  - \* kalagoysyo barar.

Calaamadahaas midkood ayaa iyana lagu arki karaa jirka:

Finan xanuun  
badan oo ogada  
ku dhammaada

Finan cuncun leh  
oo ka soo baxa  
calaacalaha

Cambaaro  
goobaaban



Astaamahaas oo dhammi iskood ayey u suulaan.  
Qofku wuxuu ismoodaa in uu raystay.

Waraabowga aan la daaweyni wuxuu dhaawici karaa  
x bnaha jirka oo dhan.

Waraabowgu wuxuu keeni karaa:

- \* Qallal
- \* Wadna xanuun
- \* Waalli iyo cudurro kale

## LATACAALKA WARAABOWGA

- Waraabowga waxaa u daawo ah benisiliin.  
12 beri oo isku xiga ha la isku mudo irbado  
benisiliin ah. Qofka ku bogsan waayaa ha  
raadsado talo takhtar.

- Waraabowga yaan la qarsan. Markaad isku tuhuntid deg-deg ugu tag takhtar.

### KA HORTAGGA JABTADA IYO WARAAABOWGA

- Qofka waraabow qaadaa waa inuu deg-deg isu daweyyaa si aanu dadka kale u qaadsiin. Waa in aanu u galmoon qof kale ka hor inta uu dawada dhamaysanayo. iyo 3 maal mood oo ka dambaysa.
- Waa in qofka qabaa siiba raggu wargeliyaa qofkii uu waraaboga ka qaaday.
- Ka feejignow qofka aad u galmoonyayso. Dadka dhillaysta iyo dhillaysigaba iska ilaali.
- Qofka lagu og yahay jabti ama waraabow ha lagula taliyo in uu isdaaweeyo iyo in aanu dadka kale sarayn.
- Ha laga dheeraado ragga iyo haweenka lagu ogyahay ama lagu tuhunsanyahay jabti ama waraabow.
- Ha laga dheeraado dhillooyinka oo yaan xaa-saska la sarayn. Ubakana yaan la indhatirin.
- Ha lagu dadaalo nadaafadda xawada.


## LIFAAQA 1aad

### MUSQULAH A WANAAGSAN IYO SIDA LOO DHISO


*Musqulaha fiican waa kuwa godkoodu kabbis yahay, daloolkooduna daboolan yahay si aalu u gelin cayayaanka iyo jiirka. Cayayaanka loo diidan yahay waxa ka mid ah duqsiga iyo baranbarada.*

*Sida loo sameeyo kabis shamiinto ah:*

1. *Qod god dhinac walba ah hal mitir, qotankiisuna yahay 7 sentiimitir. Hubi in salka godku siman yahay.*




2. *Sida ka muuqata sawirka u dhig biro siman barta-nkana ka bannee dalool.*




3. *Shabaqa birta ah ku rid godkii . 3 sentiimitir kor u soo qaad shabaqa birta ah adigoo afar rukun u dhigaya?*




4. *Baaldi ku rid daloolka ka dhex bannaan shabaqa.*




5. Isku qas shamiinto, ciid  
quruurax iyo biyo oo ku  
shub shabaqa dushiisa ilaa  
intii uu xajmigu noqonau  
5 sentiimitir



6. Marka kabbisku kafafo  
ka bixi baaldiga.  
Ku ded jawaanno qoyan  
oo dharbi maalin kasta.  
Saddex beri ka dib soo  
saar kabbiska



7. Godka afkiisa u samee  
dabool qori ah.



Si aan cudur uga dhalan waa in ay musquushu  
ka fogataa guryaha iyo ceelasha ama wabiga  
ugu yaraan 20 mitir.

## LIFAAQA 2AAD

### KA HORTAGGA TARANKA KANEECADA

Kaneecadu waxay ku tarantaa biyo fariisinnada.  
Waxaana tarankeeda lagaga hordegi karaa:


- (1) Biyo fariisinnada sida  
harooyinka iyo balliyada  
oo lagu shubo nafto.



- (2) Biyo fariisinnada oo loo  
sameeyo kelliyo ay biyuhu  
raacaan ama ka baxaan.



- (3) Iyadoo kalluun lagu beero  
biyo fariisinnada iyo  
baraagaha, kalluunkaas  
oo ah nooca quuta  
lulumada kaneecada.



*Waxaa lagu daabacay*

X.W.D.W. 1982